Lifaaqa B: Foomka Oggolaanshaha
Fahamka saameynta habka HEARTS uu ku leeyahay caafimaadka maskaxda iyo fayo-qabka, iyo aqoonsiga sida loo horumarin karo ama loo hagaajin karo.

Waxaa foomkan ku jira saddex qaybood. Qayb kasta waxa ku qoran bayaan, waxaana lagaa codsanayaa inaad calaamad sax (✓) ku dhigto haddii aad fahamtay. Fadlan weydii wixii su'aalo ah ee aad qabto markaad akhrinayso bayaannadaas.

Qaybta 1aad waxay ka kooban tahay bayaanno muujinaya fahamkaaga, waxaana lagaa codsanayaa inaad calaamad sax (✓) ku dhigto mid kasta haddii aad fahamtay. Fadlan weydii wixii su'aalo ah ee aad qabto markaad akhrinayso bayaannadan.

Qaybta 2aad waxay ku waydiinaysaa oggolaanshahaaga inaad ka qayb qaadato daraasaddan. Fadlan dooro "Haa" ama "Maya" si aad u muujiso doorashadaada.

Qaybta 3aad waxay ku waydiinaysaa oggolaanshahaaga in xogta lagaa ururiyo daraasaddan dib loogu isticmaalo cilmi-baarisyo mustaqbalka la samayn doono. Fadlan dooro "Haa" ama "Maya" si aad u muujiso doorashadaada.

Waad ku mahadsan tahay ka qaybqaadashadaada.

1. Fahamka Guud.	**Calaamadee (✓)**
Waxaan xaqiijinayaa inaan akhriyey oo fahmay Warqadda Macluumaadka Ka-Qaybgalaha ee daraasadda kor ku xusan. Macluumaadka si buuxda ayaa la ii sharxay, waxaana fursad u helay inaan weydiiyo su'aalo, kuwaas oo dhammaantood looga jawaabay si aan ugu qanco.	
Waxaan fahamsanahay in ka qaybgalka daraasaddani uu gebi ahaanba yahay ikhtiyaari. Haddii aan go'aansado inaanan doonayn inaan ka qayb qaato, waan ka bixi karaa daraasaddan wakhti kasta anigoon bixin sabab. Waxaan fahamsanahay in go'aansiga inaanan ka qayb qaadan aysan keenayn wax cawaaqib xun ah. Waxaan sidoo kale fahamsanahay inaan weli ka qayb geli karo fadhiyada HEARTS xitaa haddii aanan ka qayb qaadan daraasaddan.	

Waxaan fahamsanahay in xogtayda gaarka ah ay falanqayn doonaan kooxda cilmi-baarista ee Trinity College Dublin iyo World Vision. Waxaan fahamsanahay in dhammaan macluumaadka la ilaalin doono, si qarsoodi ahna loo kaydin doono, isla markaana aan magacayga ama xog kale oo igu aqoonsan karta aan la shaacin doonin.	
Waxaan fahamsanahay inaanan heli doonin magdhow (lacag celin) loogu talagalay waqtigayga ama kharashaadka safarka ee aan ku qaato ka qaybgalka daraasaddan.	
Waxaan fahamsanahay in xogtayda gaarka ah la ilaalin doono si waafaqsan shuruucda caalamiga ah ee ilaalinta xogta.	
Waxaan ogahay sida aan ula xiriiri karo kooxda cilmi-baarista iyo/ama World Vision haddii aan u baahdo.	
2. Oggolaansho	
Waxaan oggolahay inaan ka qayb qaato daraasaddan cilmi-baarista, anigoo si buuxda loogu wargeliyey **khataraha, faa'iidooyinka iyo ikhtiyaarrada kale** ee jira, kuwaas oo si faahfaahsan loogu sharaxay warqadda macluumaadka ka-qaybgalaha ee la i siiyey.	**Haa** ☐ **May** ☐
Waxaan oggolahay in codkayga la duubo inta lagu jiro wareysigayga.	**Haa** ☐ **May** ☐
Waxaan oggolahay in xogtayda gaarka ah ee lagu ururiyo daraasaddan lala wadaago kooxda cilmi-baarista ee Trinity College Dublin iyo World Vision si loo fahmo saameynta habka HEARTS ee caafimaadka maskaxda, isla markaana loo aqoonsado talooyin ku saabsan sida loo horumarin karo, sida lagu sharaxay warqadda macluumaadka ka-qaybgalaha.	**Haa** ☐ **May** ☐
Waxaan oggolahay in cilmi-baarayaashu igula soo xiriiraan iimayl, taleefan, ama si toos ah oo fool-ka-fool ah, taas oo qayb ka ah daraasaddan cilmi-baarista.	**Haa** ☐ **May** ☐
3.Oggolaanshaha Isticmaalka Mustaqbalka	
Waxaan oggolahay in xogtayda gaarka ah si ammaan ah loo kaydin karo, loona isticmaali karo cilmi-baaris mustaqbalka la xiriirta daraasaddan. Dhammaan macluumaadka waxaa loo kaydin doonaa si waafaqsan shuruucda caalamiga ah ee ilaalinta xogta. Xogtaada gaarka ah waxaa lagu ilaalin doonaa iyadoo la adeegsanayo lambar aqoonsi gaar ah halkii magacaaga la isticmaali lahaa.	**Haa** ☐ **May** ☐

Markaan dhammeeyo qaybaha kor ku xusan oo aan saxiixo dukumeentigan, waxaan oggolahay inaan ka qayb qaato daraasaddan sida lagu sharaxay Warqadda Macluumaadka Ka-qaybgalaha.

Magaca Ka-qaybgalaha Saxiixa Ka-qaybgalaha Taariikh